







 **COTA**  Kaalmo





Kaarkaan Tilmaamaha ayaa ku siinaaya tilmaamo muhiim ah inta aad raacayso COTA. Guji "Next Card (Kaarka Xigga)" ee hoose si aad u biloowdo!



  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga



Xaga 1 of 16 



XAGA 1 OF 16


 **COTA**  Kaalmo



Xili hore qorsheyso safarkaaga. Si aad u barato sida loo qorsheeyo safarkaaga, akhri kaarka tilmaamaha ee ciwaankiisu yahay "Qorsheynta Safarkaaga." U diyaar garoow cimilada xun oo lahoow qorshe kayd ah lacala haddii safarkaagu uusan noqon sidii aad qorsheysay.


  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga

Xaga 2 of 16 

XAGA 2 OF 16

← **COTA** Kaalmo



3. Maalinta safarkaaga, imoow astaanka dhawr daqiiqo kahor wakhtiga. Raadi lambarka boosteejada oo ku qoran dusha sare ee boorka boosteejada. Xaqiiji nuu waafaqsan yahay lambarka boosteehada aad qorsheysay inaad ka baxdo.


🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 3 of 16

XAGA 3 OF 16

← **COTA** Kaalmo



Ku sug gaariga geeska wadada boosteejada. Boosteejooyinka qaar waxaa ka baxa gaadiidka jihooyinka kaladuwan aada. Boosteejooyinka u adeegga jihooyinka kaladuwan waxay leeyihiin lambar far waawayn ah, magacyada wadooyinka iyo midabyo. Mar kasta eeg lambarka wadada iyo magaca ku qoran dusha gaari kasta marka uu soo galo boosteejada. Marka aad aragto gaari leh lambarka iyo magaca ku qoran tigidhkaaga, horay ugu dhaqaaq boorka booteejada.

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 4 of 16

XAGA 4 OF 16

 **COTA**  Kaalmo




Haddii gaarigaaga COTA uusan imaan wakhtiga loo mudeeyay iyo/ama abkaaga safarku uusan muujinayn wakhtiga saxda ah ee imaatinkiisa, fariin qoraal ugu dir lambarka boosteejada ee ku qoran boorka astaanka lambarka 95292. Kan ayaa ku siinaaya xogaha fariin qoraalka ah ee ku saabsan gaarigaaga. Waxaad sidoo kale wici kartaa lambarkaan 614-228-1776 si aad ula hadasho Shaqaalaha Adeegga Macaamiisha.


  **Dhagayso**

 **Kaadhka Hore** **Kaadhka Xiga** 



Xaga 5 of 16 


XAGA 5 OF 16

 **COTA**  Kaalmo



Dhammaan gaadiidka COTA waxaa ku xiran rakooyinka baaskiilka oo ku dhagan qaybta hore ee gaariga. Haddii aad wadato baaskiil, u sheeg Darawalka in aad dooneyso in baaskiilka lagu saaro gaariga.

  **Dhagayso**

 **Kaadhka Hore** **Kaadhka Xiga** 

Xaga 6 of 16 

XAGA 6 OF 16

← **COTA** Kaalmo




Marka aad timaado meeshii aad u socotay, u sheeg Darawalka in aad u baahan tahay in baaskiilkaaga laguu soo dejiyo. Ku celi rakada baaskiilka meeshii aad kasoo bixisay.

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 7 of 16

← **COTA** Kaalmo



Haddii aad wadato aalada socodka ama u baahan tahay in lagaa caawiyo fuulista ama ka degashada baska, u sheeg Darawalka. Wuxuu hoos u dhigi karaa baska ama wuxuu kuu dhigi karaa salaanka.

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 8 of 16

← **COTA** Kaalmo



Diyaarso qaabkaaga bixinta lacagta bas raaca. Eeg kaarka tilmaamaha ee ciwaankiisu yahay “Lacagaha Bas raaca iyo Qaababka loo Baxsho” si aad xog dheeri ah uga ogaato sida loo baxsho qarashka bas raacaaga ee COTA. Waxaad gelin kartaa lacagtaada bas raaca ee kaashka ah bokiska lacagaha, waxaad iskaanka marin kartaa abka Transit, ama waxaad kaarkaaga COTA Smartcard marin kartaa mashiinka xaqiijinta. Ka codso darawalka warqada wareejinta haddii aad u baahan tahay.


🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 9 of 16

XAGA 9 OF 16

← **COTA** Kaalmo




10. Inta lagu jiro safarkaaga, raadso kursi. Haddii aysan jirin kuraas la heli karo, raadso tiir ama suun aad cuskato. Xaqiiji inaad ka danbayso laynka rakaabka ee cad ama jaallaha ah ee ku yaala sagxada gaariga. Haddii aad adeegsanayso gaari curyaan, Darawalka ayaa kaa caawinaaya in aaladaada si amaan ah meel loogu xiro.


🔊 Dhagayso


← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 10 of 16



XAGA 10 OF 16

← **COTA**  Kaalmo






Inta aad gaariga saaran tahay iska fiiri geesahaaga. Gaariyaasha COTA waxay leeyihiin bareysyada jaajarka waxayna leeyihiin Wi-Fi bilaash aad ku isticmaalayso. Si aad u hesho xeerarka iyo tilmaamaha gaari raacista, eeg kaarka tilmaamaha ee la yiraahdo: "Helitaanka Caawimaad, Raacista Safar Amaan ah iyo Xeerarka iyo Tilmaamaha Gaari Raaca."

  **Dhagayso**

← Kaadhka Hore **Kaadhka Xiga** →

Xaga 11 of 16 

XAGA 11 OF 16

← **COTA**  Kaalmo







Gaariyaasha COTA ayaa u shaaciya boosteejada ay yimaadaa qaabab kaladuwan. Boosteejooyinka ayaa laga shaacin karaa cod lagu sheegaayo mikrafoonka. Dhageyso shaacinta boosteejadaada inta lagu jiro safarkaaga.



  **Dhagayso**

← Kaadhka Hore **Kaadhka Xiga** →



Xaga 12 of 16 



XAGA 12 OF 16


 **COTA**  Kaalmo





Boosteejada ayaa sidoo lagu muujin karaa qoraal ka muuqanaaya shaashad ku xiran qaybta hore ee gaariga. Haddii aad adeegsanayso abka Transit, waxaad laa socon karta ameesha aad marayso inta aad gaariga saaran tahay. Adeegso dadka yaqaana marka ay tahay inaad gaariga ka degato.



  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga



Xaga 13 of 16 



XAGA 13 OF 16


 **COTA**  Kaalmo



U sheeg Darawalka in aad dooneyso inaad gaariga uga degato boosteejada xigta. Jiid xariga jaallaha ah ee ka koreeya daaqada.


  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga

Xaga 14 of 16 

XAGA 14 OF 16

← **COTA** 🔄 Kaalmo



Haddii ay suurtagal tahay, ka bax albaabka danbe ee gaariga. Haddii aan albaabku si otomaatig ah u furmin, taabo si uu u furmo. Waxaad ka bixi kartaa albaabka hore ee gaariga haddii aad u baahan tahay n baska hoos loo dhigo ama salaan lagu dhigo. Waxaad sidoo kale bixi kartaa albaabka hore haddii aad u baahan tahay inaad la degto baaskiilkaaga.

🔍


🔄 **Dhagayso**

← Kaadhka Hore **Kaadhka Xiga** →

Xaga 15 of 16

XAGA 15 OF 16

← **COTA** 🔄 Kaalmo



Ilaali badqabkaaga! Kadib marka aad gaariga ka degato, ka fogoow gaariga si dhakhso ah. Sug inta gaarigu ka baxaayo geeska wadada kahor inta aadan goyn wadada. Gaarigu waa wayn yahay, gaariyaasha kalena kuma arki doonaan marka aad wadada goynayso.

🔍

🔄 **Dhagayso**

← Kaadhka Hore **Waan Dhameeyay** ✓

Xaga 16 of 16

XAGA 16 OF 16